



SOMALI BAR ASSOCIATION

Tix: UQS/10/2020

TR. 01/08/2020

WAR-SAXAAFADDEED KU SAABSAN *HABRAACA MAGACAABIDDA XUBNAHA GOLAHA ADEEGGA GARSOORKA*

Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu udub-dhaxaad iyo bud-dhig u yahay hay'adda Garsoor Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Wuxuu ahmiyad gaar ah u leeyahay madaxbannaanida, tayada, hufnaanta iyo xaqsoorka Garsoorka Dalka.

Shirkii Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda xil-gaarsiinta ee ku taariikhaysnaa 30-kii Bisha Luuliyo 2020 ayaa lagu ansixiya Shan xubnood oo la sheegay in ay ka mid noqonayaan xubnaha ku imaanaya magacaabidda ee Golaha Adeegga Garsoorka.

Sida uu dhigayo **Qod.109A, Faqraddiisa 2aad, Xarafka "D" ee Dastuurka KMG**: Labo Xubnood oo ka mid ah Shanta xubnood ee ku imaanaya magacaabista waxaa soo magacaabaya Ururka Qareennada Soomaaliyeed, waxayna xilka haynayaan muddo Afar Sano ah.

Sidoo kale **Xarafka "E", Faqradda 1aad, Qod.6aad ee Sharci L.28 soona baxay 8-dii Luuliyo 2014** (Sharciiga dhisidda Galaha Adeegga Garsoorka) waxay jideynaysaa in Ururka Qareennada Soomaaliyeed soo magacaabayo Labo Qareen sare oo ka tirsan Ururka oo xilka haynaya muddo Afar Sano ah.

Haddaba, Ururka Qareennada Soomaaliyeed wuxuu caddeynayaa in shanta xubnood ee ay magacaabeen Golaha Wasiirrada Xukuumadda xil-gaarsiinta aysan ka tirsanayn Ururka Qareennada Soomaaliyeed iyo Ururrada Qareennada Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, sidoo kale aysan ka mid ahayn qareennada ku qoran diiwaanka Qareennada ee (ALBO), sidaasi darteedna habraaca magacaabiddoodu uu noqonayo mid baal-marsan Dastuurka iyo Sharciga Golaha Adeegga Garsoorka.

Ururka Qareennada Soomaaliyeed isagoo la tashanaya Ururrada Qareennada Dowladaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka wuxuu u gudbin doonaa Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka JFS labada xubnood ee ka imaanaya Qareennada si waafaqsan Dastuurka iyo Sharciga Golaha Adeegga Garsoorka.

